JÖNKÖPING UNIVERSITY
School of Health and Welfare

Research profile at Jönköping University

Information – vårdnadshavare

# Waxaa halkan leydinka weydiinayaa ka waalid ahaan ka qeybqaadashada cilmibaaristan: ”Caafimaadka dhimirka iyo ka qeybqaadashada caruurta iyo dhalinyarada naafada ah”

**Aasaaska iyo ujeedada**

Sanadihii ugu dambeeyey waxay u fiirsadeen cilmibaarayaasha iyo jaraa’idada xaaladda caafimaadka dhimirka ee caruurta iyo dhalinyarada ee Iswiidhan. In dhimirka laga caafimaad qabo waxaa mararka qaar loo sharaxaa ineysan dhibaato dhimir jirin, laakiin caafimaadka dhimirka waxaa xitaa lagu sharixi karaa waxyaabo ay caruurtu dareemayaan. Waxaan rumeysannahay calaamadaha kale ee caafimaadka fiican ee dhimirka si howlkara uga qeybqaato hawlaha bulshada si caafimaada

Baaritaanka caafimaadka dhimirka waxaa inta badan laga reebay caruurta iyo dhalinyarada naafada ah oo ay ku adag tahay ineey ka jawaabaan su’aalaha foomka. Sidaa darteed wax badan kama ogin caafimaadka dhimirka ee caruurta iyo dhalinyarada naafada ah. Cilmbaaritaankaan waxaan rabnaa inaan ku baranno sida uu noqdo caafimaadka dhimirka ee caruurta iyo dhalinyarada naafada ah. Waxaan xitaa rabnaa inaan baarno caruurta iyo dhalinyarada ka qeybgalkooda maalmeed ee ku xiran dareenkooda caafimaadka dhimirka isla markaas iyo muddo dheerba.

**Sidee baaritaanka u dhacayaa?**

Waxaan ku weydiineynaa adiga/idinka waalidka caruurta naafada ah xiriirna la leh habiliteerinka/baxnaaninta mid ka mida gobolada(Västmanland, Östergötland, Gävleborg, Jönköping, Örebro) buuxiyey 4-6 sano ama 10-12 sano sanadkii 20019. Waxaan rabnaa inaan caruurtaan weydiinno hal mar sanadkiiba muddo shan sano gudahooda dareenkooda caafimaadka dhimirkooda iyo siday dareemayaan ineey uga qeybqaataan nolol maalmeedkooda. Haddii warbixinta caruurtiinna ku jirto diiwaanka baxnaaninta/habiliteerinka caruurta halkaasaan kala soo baxeynaa. Diiwaanka HabQ, ee ah mid waddanka oo dhan u dhexeeya oo ogaanshaha tayada habiliterinka/baxnaaninta. Waxaan xitaa eegeynaa kaalmadee ayey habiliteerinka/baxnaaninta caruurta siiyeen caruurtaada

Waxaa markaa macquula inaan la soconno horumarka xaaladda caafimaadka dhimirka iyo ka qeybqaadashada muddo siyaan u ogaanno xaaladda caafimaadka dhimirka iyo ka qeybqaadashadu sidey isu saameynayaan. Cilmiga noocaana wuxuu fududeeynayaa sidii waqti hore wax looga qaban lahaa dhibaatooyinka imaan kara.

Waxaan xitaa rabnaa inaan wax kaa weydiinno adiga/idinka ka waalid ahaan caruurtaada. Waxaa adiga/idinka leydinka codsanayaa inaad ka jawaabtaan su’aalaha foomkan oo ku saabsan caruurtaada xaaladdooda

caafimaadka dhimirka iyo hawlaha maalmeedka hal mar sanadkii muddo afar sano gudahooda. Foomka su'aalaha waxaa looga jawaabi karaa bogga internetka ama haddaad rabtaan warqad ahaan. Waan kulmi karnaa xitaa haddaad rabtaan in leydinka caawiyo buuxinta foomka. Buuxinta foomka su'aalaha wuxuu qadanayaa 45 daqiiqado.

Waxaan xitaa rabnaa inaan la kulanno caruurtaada/caruurtiinna, siyaan ula hadalno, su'aalana uga weydiinno xaaladda caafimaadkooda dhimirka iyo ka qeybqaadashooda hawlahooda nolol maalmeedka.Sidaan wax u weydii-neyno waxaan waafajin doonnaa garaadkooda caruurta. Wadahadalkaan wuxuu ka dhacayaa meesha caruurtu ay rabaan, iskuulka, baxnaanbixinta (habiliteringen) ama guriga. Wadahadalku wuxuu socon 1 saac

Baaritaankaan wuxuu salka ku heyndoonaa su'aalihii foomka ee caruurta iyo waalidka natiijadoodii natiijadoodii. Waxaan halkaa ka heli doonna sidey rajadeynu tahay aqoon aad ugu faa'iidole caruurta iyo waalidkooda.Sidaa darteed rajadeennu faa'iidada cilmibaaristaan ayaa ka badan qatarta ka iman kara, maadaama aqoonta laga helaayo cilmibaaristaan ay keeni karto wanaag xaalad caafimaad dhimir iyo ka qeybqaadashada caruurta naafada ah iyo weliba kaalmooyinka laga siinaayo habsocodka baxnaaaninta(habiliterngsprocessen) oo noqda mid aad ugu habboon baahida caruurta iyo waalidkooda.

Qatarta ka iman karta mashruucaan waa in waalidku iyo caruurtu sii gudbiyaan warbixintooda iyo nolol maalmeedkooda ku wajahan xaaladda caafimaadka iyo ka qeybqaadasho la'aantooda markaa annaga ka cilmibaareyaal ahaan masuulyad weyn baa na saaran inaaneey taa ku noqon sharaf meel kaga dhac sumcadda ka qeybqaatayaasha.

Waxay ujadadeennu tahay inaan helno tallaabo macquula oo aan uga hortegi karno taas. Sidaa darteed waa muhiim in la fahmo tallaabooyinkoo dhan, xitaa kuwaa faa'iidada keenaaya iyo faa'iidada caafimaadka leh, ineey yihiin kuwo saameyn ku leh shaqsiyadda iyo nolosha qoyska iyo nolol maalmeedkooda.

Haddii ka qeybqaadashada cilmibaaristaan ay su'aalo kugu dhalineyso ama fikir ah adiga/idinka xaaladda caruurtiinna.waxaad la xiriiri kartaan baxnaaninta(habiliteringen) ay caruurta iyo waalidka xiriika la leeyihiin. Gobolada baxnaaninta ee qeyb ka qaadanayaa mashruuca cilmibaaristaan horaa loo wargelyey in mashruucii uu socdo weyna la socdaan hawsha. Waxaad xitaa la xiriiri kartaan Anna Karin Andersson oo ah xiriiriyaha mashruuca cilmibaarista ka socota gobolkiinna(eeg macluumaadkaan hoose) kaa soo markaa hore kuu sii gudbin doona.

**Maareynta macluumaadka la ururiyey**

Jawaababha caruurtaada/diina iyo natiijada waxaa loo xafididoonaa siyaannu qofaan shaqo ku lahayn uusan u arkin

Dhammaan foomka su'aalah waxaa la siin doonaa kood bedeli doona macluumaadka shaqsiga. Koodka lagu garanaayo qofkee ayaa helay lambarkee meel goonniya ayaa lagu keydin doonaa, si aanuu qofaan shaqo ku lahayn isugu xirin macluumaadka iyo lambarka varuurtaada/diinna shaqsiyadoda ee aad na siiseen. Macluumaadka cilmi baaristaan oo dhan waxaa lagu keydin doonaa sanduuq xiran oo dab qabsan karayn muddo 10 sano ah ka dibna waa la baabi'in doonaa. Kuuliyadda/Jaamacadda Jönköping ayaa ah madaxa mashruucaan cilmibaaristan, taas macnaheeda waa xagga ka sharci ahaan taasoo hawlaha cilmibaarista lagu qabanayo.

Sida uu qabo shuruucda EU:ga ee shuruucda ilaalinta keydka macluum-aadka wuxuu qofka ka qeybqaadanaya cilmibaaris, sida adiga/indinka/ caruurta, waxay xaq u leeyhiin kharash la'aan ineey wax ka ogaadaan macluumaadka cilmibaarista loo isticmaalaayo, iyo inaad haddaad u baahato hesho waxyaabaha macquul qaldamayee la saxay. Adiga/idinka/caruurta waxaad codsan kartaan in macluumaadka la tirtiro iyo in maareeynta macluumaadka la xaddido. Tirtiridda iyo bedelka macluumaadka waa macquul intaanan laga shaqeynin ururinta, macnaha intaanay qeexidda macluumaadka la ururiyey la sameyn. Haddii aad rabto inaad heshid macluumaadka waxaad la xiriireysaa masuulka cilmibaare Mats Granlund Kuuliyadda/Jaamacadda, e-post: mats.granlund@ju.se, telefon: 036-101221. Matalaha ilaalinta macluumaadka Kuuliyadda/Jaamacadda Jönköping waa Oskar Westergren, e-post: dso@ju.se telefon: 036-101779. Haddadan ku qanacsaneyn sida loo maareeynaayo macluumaadkaada shaqsi waxaad xaq u leedahay inaad cabasho u dirato Hey'adda ilaalinta macluumaadka, oo ah midda ilaalisa. Xagga sharci ahaan aas aaska maareynta macluumaadka shaqsiyada ee sida uu qabo shuruucda EU:ga ee shuruucda ilaalinta keydka macluumaadka waa in cilmibaarisaha lagu sammeeyo jaamacadaha iyo kuuliyadaha iyo xafiisyada dawladeed ee kale ay yihiin macluumaad bulshada ka dhexeeya.Waana sidoo kale cilmibaarisha ay qasabka tahay in ogolaasho laga helo sharciga eegidda anshaxa

Natiijada waa laga shaqeyn doonaa lana soo bandhigi doonaa si aanan qofna shaqsiya looga garan kareyn. Cilmibaarista waxaa lagu soo daabici doonaa jaraa'idka/warbixinnada iyo kulanka. Daabicidahaan qof shaqsi ah laga garan ma doono.

**Si xor ah**

Haddii aad Adiga/Idinka aad ogolaataan inaad ka qeybqaadataan cilmibaarista, waxaan kaa baryeynaa inaad saxiixdid foomka ogolaanshaha dibna aad noogu soo dirtid bashqadda jawaabta ee ku lifaaqan. Waan kula soo xiriiri doonnaa adiga/idinka islana qabsan doonnaa waqtiga aan wareysan karno caruurtaada/caruurtiinna iyo sidaad Adiga/Idinka rabtaan inaad uga jawaabtaan su'aalaha masuulka caruurta(Bogga kombiyuutarka ama warqad ahaan).

Haddii Adiga/Idinka ka masuul caruur ahaan ama caruurtiinna/caruurahiinna ay su'aalo ka qabaan cilmibaaristaan Aidiga/Idinkaba soo dhawaada inaad noo soo qortaan ama na soo wacdaan annaga oo masuuliyiinta cilmibaaristaan ah.

Macasalaama

Masuula baaraha:
Mats Granlund kuuliyadda/Jaamacadda
Box 1026, 551 11 Jönköping
Tel: 036-101221,
E-post: Mats.Granlund@ju.se

Xiriirayaha gobolka Region Gävleborg
Anna Karin Andersson
Hälsohögskolan
Box 1026, 551 11 Jönköping
Tel: 036-10 16 71
E-post: annakarin.andersson@ju.se